

MACLUUMAAD KA SOCDA DEGMADA ØVRE EIKER OO KU SAABSAN TALAALKA COVID-19

Qaado talaalka – difaac adiga iyo dadka kaleba!

Hadafka koowaad ee talaalka koroonadu waa in la difaaco nafta iyo caafimaadka dadka u nugul in xanuun daran kaga yimaado Covid-19. Talaalka Noorway waa ikhtiyaar, isla markaana talaalka cusub ee Covid-19 waa bilaash. Waxannu kugula talinaynaa in aad qaadato talaalka marka lagu siiyo fursad.

Ujeedada talaalku waa:

- yaraynta halista ku saabsan geerida
- yaraynta halista ku saabsan xanuun daran
- Ilaalinta jiritaanka adeegyada iyo kaabayaasha bulshadu ka maarmi karin
- ilaalinta shaqooyinka
- dib u furista isu socodka bulshada

Maamulka degmadu waxa uu dhammaan dadka degan ee ka weyn 18 sanno ugu baaqayaa in ay sida ugu dhakhsaha badan isaga diiwaangeliyaan nidaamkeena talaalka ee dhijitaalka ah, haddii ay rabaan talaal iyo haddii kaleba.

Qaabkan ayaad isu diiwaangelinaysaa:

- 1) iskaa is diiwaangeli
- 2) caawimo ka hel ehel ama qof aad si wacan u taqaano
- 3) wac telefoonka talaalka

Doorasho 1:

[Taabo halkan si aad u gasho diiwaangelinta](#). Taabo qariirada

aduunka ee midigta kore haddii aad rabto in aad afka u beddeshid mid aan ahayn noorweyjiga. Waa in aad ku gasho BankID. Raac tilmaamaha. Haddi aad rabto talaal, waxannu isticmaali doonnaa telefoonka kuu diiwaangashan si aannu kuu siino macluumaad ku saabsan xilliga aad u leedahay talaalka.

Doorasho 2:

Caawimo weydiiso ehel ama dad aad taqaano si aad isu diiwaangeliso. Eeg doorashada 1, [ama taabo halkan si aad u hesho faahfaahin](#) (af-noorweyji). Qofka ku caawinayaa waa in uu ku galo BankID isagu leeyahay, kadib waa in uu geliyo macluumaadka loo baahan yahay ee kugu saabsan. Waxannu isticmaali doonnaa telefoonka kuu diiwaangashan si aannu kuu siino macluumaad ku saabsan xilliga aad u leedahay talaalka.

Doorasho 3:

Ma u baahantahay caawimo? Waca **telefoonka** talaalka ee degmada oo ah **tel. 906 83 432**. Waxannu fahmi karnaa af-noorweyjiga iyo ingiriisiga. Waa in lagu talogalo in la sugo waqti xoogaa ah.

Maxaa dhacaya kadib markaan is diiwaangeliyo?

Marka aad is diiwaangeliso, waxaad heli doontaa farriin qoraal ah oo telefoonka laguugu soo dirayo. Marka la gaadho xilliga aad u leedahay talaalka, waxa lagu soo diri donnaa farriin qoraal ah oo cusub oo wadata **cinwaan** aad ku gelayso nidaam laga samaysto balan. Taabo cinwaankaas si aad u qabsato balan sida ugu dhakhsaha badan kadib marka aad hesho farriinta qoraalka ah.

Ma la hubo xilliga talaalku noqon doono, waxay ku xidhan tahay xilliga degmadu hesho talaalka. Si degdeg ah ayaa qofka loogu yeedhi karaa.

Talaalku wuxu ka kooban yahay **labo qaadasho** oo loo baahan yahay in loo kala dhaxaysiiyo tiro usbuucyo ah. Marka aad balansato xilliga qaadashada koowaad ee talaalka, waxa si iskeed ah laguugu samaynayaa balanta dambe ee qaadashada labaad.

Halkee lagu qaadanayaa talaalka?

Caadi ahaan waxa talaalista oo dhan lagu bixinayaa xarunta talaalka ee ku taala **dhismayaashii hore ee Bergans, Loe Bruk nr 9 oo ku taala Loesmoen, Hokksund**. Markay jiraan xaalado gaar ah waxa dadka qaar lagu talaali karaa gurigooda.

Ma rabtaa macluumaad kale?

[Taabo halkan si aad u hesho macluumaad kale oo ku saabsan talaalka Covid-19.](#)